
# Macluumaadka xiriirka muhiimka ah




## Xafiisyada LD/CPS ee gobolka oo dhan

**REGION 1**
316 W. Boone Ave.,
Ste 500
Spokane, WA 99201
509-828-9726

**REGION 2**
1002 N. 16th Ave.,
Yakima, WA 98902
509-225-7935

**REGION 3**
8625 Evergreen Way,
Ste 250
Everett, WA 98208
425-595-3470

**REGION 4**
4045 Delridge Way SW,
Ste 201
Seattle, WA 98106
206-926-4934

**REGION 5**
1949 S. State St.,
Tacoma, WA 98405
253-983-6132

**REGION 6**
6860 Capitol Blvd. SW,
Bldg #2
Tumwater, WA 98501
360-725-6656

## Waalidka Koriya Carruurta Lagu Ogyahay oo keliya

Foster Intervention and Retention Support Team ama FIRST (Kooxda Taakuleynta Haynta ee Waalidka Koriya Carruur Lagu Ogyahay) waa meel u diyaarsan waalidka carruurta koriya si ay uga helaan caawimaad marka uu jiro danbi-baarista LD/CPS. Waxa kale oo ay dadka u sii gudbiyaan meelo kale oo muhiim ah. Waxaad xafiiska FIRST kala soo xiriiri kartaa 866-393-6186.

Shaqaalaha Xannaannada Carruurta waxay eegi karaan barta intarnetka DCYF si ay uga helaan maacluumaad iyo taakuleyn **www.dcyf.wa.gov**.

**Washington State Department of Children, Youth & Families**
Licensing Division
1115 Washington St. SE
PO Box 40981
Olympia, WA 98504

Haddii aad tahay qof naafo ah oo ka walaacsan xuquuqdaada laguugu siiyey Americans with Disabilities Act (Xeerka Ameerikaanka Naafada ah), fadlan ka eeg daabacaada Public Notice of Nondiscrimination (Ogeysiiska Dadweynaha ee Takoor La'aanta) (HR_0012) wixi macluumaad dheeraad ah iyo tilmaamaha kusaabsan sida cabasho loogu gudbiyo onlaynka halkan **www.dcyf.wa.gov/publications-library/HR_0012**.

*Haddii aad rabto koobbiga waraaqahan oo ku qoran hab kale ama luuqad kale, fadlan kala soo xiriir DCYF Constituent Relations (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **ConstRelations@dcyf.wa.gov**).*

DCYF PUBLICATION LIC_0002 SM | DSHS 22-452 SM (04-2022) Somali

# Danbi-baarista Xannaannada Gobolka ee Adeegyada Ilaalinta Carruurta



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# Waaxda Shatiga/Danbi-baarista Adeegyada Ilaalinta Carruurta (LD/CPS)

## Maxaa dhacaya marka ay jirto danbi-baaris la xiriirta adeegyada ilaalinta carruurta?

Warbixintan ayaa sharxeysa waxa dhacaya marka ay Department of Children, Youth & Families (Waaxda Carruurta, Dhallinta & Qoysaska) ee Gobolka Washington ama DCYF ka war hesho haddii qof shati ku haysta xannaannada carruurta ama shatiga ka sugaya gobolka uu dhibaateyn ama dayacaad u geysto carruur. Arrintan waxaa ku jira guryaha lagu hayo carruurta la koriyo, goobaha deegaanka ama dadka kooxda ah, guryaha xannaannada carruurta ee qoysaska, xarumaha xannaannada carruurta, meelaha gobolku sharciyeeyo iyo/ama shaqaalaha ka shaqeeya meelahaas.

## Waa maxay dacwad?

Marka ay jiraan dad rumeysan in carruur la dhibaateeyey ama la dayacay, waa in ay soo sheegaan oo dacwad u soo gudbiyaan DCYF. Qof kasta oo rumeysan in carruur la dhibaateeyey ama la dayacay waa in uu soo garaaco 1-866-ENDHARM ama 9-1-1 si uu uga soo warbixiyo. Haddii dacwaddu ay ka dhan tahay goob xannaano carruur oo shati la siiyey, ama goob shatiga sugeysa, kiis ahaan ayaa danbi-baaristooda loogu gudbinayaa LD/CPS. Danbi-baarista dacwooyinka ee LD/CPS ee ah jirdilid, faraxumeyn, habdhaqan dayacaad ah iyo/ama xannaano xun, falal suuqgelin ama ganacsi galmo ah iyo nafgoyn ilma aan dhalan ama aan qaangaarin.



## Maxaa dhacaya marka ay LD/CPS sameyso danbi-baarista dacwado ah dhibaateynta ama dayacaadda carruurta?

Danbi-baaruhu wuxuu sameynayo:

- Wuxuu la xiriirayaa booliska, haddii ay lagama maarmaan tahay.
- Wuxuu wareysan doonaa dhibbaneyaasha la soo sheegay.
- Adiga ayuu sida ugu dhakhsa badan kuu soo ogeysiin doonaa dacwada iyadoon wax halis ah la gelineyn danbi-baarista.
- Wuxuu fursad kuu siinayaa inaad ka jawaabto dacwada.
- Wuxuu wareysanayaa markhaatiyaasha iyo dadka kale ee macluumaad ka hayn kara arrinta dacwada.
- Goobta ayuu imaanayaa si uu u eego qoraallada, sharciyada, iyo qiimeynta goobta.
- Wuxuu talo weydiinayaa dad ah khubarada caafimaadka/cilmi-nafsiga, haddii ay lagama maarmaan tahay.
- Ku dhammeystir baaritaanka waqtigii loogu talagalay (Hadafkeenu waxa uu yahay inaan ku dhammeystirno baaritaanka muddo 45 maalmood ah, laakiin waxa ay qaadan kartaa ilaa 90 maalmood ama kabadan haddii waaxda sharci fulinta ay ku lug yeelato - Haddii aad ka walaacsan tahay inta hannaanka hawsha ay qaadaneyso, fadlan la xariir kormeeraha LD/CPS ee kusugan deegaankaaga).
- Wuxuu isagoo sharciga eegaya go'aan ka gaarayaa in ilmaha la dhibaateeyey ama in la dayacay.
- Wuxuu kuu soo dirayaa waraaq marka la dhammeeyo danbi-baarista. (Waraaqda waxaa ku qoran jawaab ah inuu jiro ama uusan jirin fal-danbiyeed. Haddii dacwada lagugu helo, waraaqda ayey ku qoran tahay sida aad racfaan uga qadaneyso jawaabta iyo wakhtiga racfaanku soconayo).

## Waa maxay jawaabta?

Danbi-baaraha LD/CPS ayaa go'aaminaya haddii ay dacwadu tahay heer dhibaateyn ama dayacaad ah sida ku qeexan sharciga gobolka ee RCW 26.44.020. Dacwa kasta waa faldanbiyeed jira ama mid aan jirin.

**Faldanbiyeedka jira waa:** Mid lagu saleeyey macluumaadka la hayo, oo waa inay u badan tahay in dhibaateyn ama dayacaad dhacday.

**Faldanbiyeedka aan jirin waa:** Mid lagu saleeyey macluumaadka la hayo, oo waa inaysan u badneyn inay dhibaateyn ama dayaacaad dhaceen, ama in la waayey caddeyn ku filan in la go'amiyo haddii dacwada dhibaateynta carruurta ah dhacday ama aysan dhicin.

Xataa haddii dacwada la isku waayo, xafiiska shatiga ayaa kaala shaqeynaya inaad ogaato wax kasta oo sharci-jebin ku ah shatiga ee lagugu helo intii ay danbi-baaristu socotay.

Haddii uusan dhismahaagu shati haysan, wixii walaac ah waxaa loo gudbinayaa maamulka barnaamijka.

LD/CPS waxay awood u leeyihiin danbi-baaris ah wixii halis ah oo keliya. Danbi-baarista wixii halis ah oo keliya waa qiimeynta halista hadda jirta ama mustaqbalka ku imaan karta carruurta goobta lagu hayo.

## Markii ay danbi-baaristu socoto waxaad sameyn kartaa:

- Inaad keensato qof kale oo aan danbi-baarista shaqo ku lahayn marka lagu wareysanayo adigoo saxiixaya oggolaanshaha macluumaadka lagaa ogaanayo.
- Diid in lagu wareysto (haddii aad diido in lagu wareysto, LD/CPS ayaa baaritaanka sameyn doono iyagoo kaala tashan ilaa aad kasoo dirto jawaab qoraal ah kahor inta aan baaritaanka la dhammeystirin).
- Ka bixi jawaab qoraal ah eedeymaha oo wixi dukumiinti kasta oo khuseeya la wadaag baaritaanka (LD/CPS waxay macluumaadka ku dari doonaan baaritaanka oo waxa ay galin doonaan faylkaaga).
- Dadweynaha in loo bandhigo waxaad ka codsan kartaa **dcyf.publicdisclosure@dcyf.wa.gov**.

## Yaan la xiriira karaa haddii aan su'aal ka qabo danbi-baarista?

Haddii aad su'aal ama cabasho ka qabto sida kiiskaga looga shaqeynayo, fadlan la xiriir maamulaha danbi-baaraha ugu horreyn. Haddii aad u maleyneyso in aan arrinta la xallin, la xiriir maamulaha sare ee badqabidda iyo ka-warhaynta ee deegaankaaga.

Si aad mar kasta caawimaad u hesho waxaad Xafiiska Xiriirka Dadweynaha kala xiriiri kartaa 1-800-723-4831.

– ama –

Waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Wakiilka Qoyska & Carruurta* 1-800-571-7321.

Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sharciyada gobolka ee lagu maamulo LD/CPS, fadlan ka eego: **http://search.leg.wa.gov/search.aspx#document**

* *Hay'addan wax shaqo ah kuma laha DCYF balse waxay awood u leedahay danbi-baarista wixii walaac ah oo la xiriira Hay'adda.*